...NTLAND

GOLAHA WAKIILLADA

ولاية بو نت لاند الصومال

مجلس النواب

---

**Garoowe, Khamiis, Taariikh: - 30/07/2026**

**Ku:- Guddoonka Golaha Wakiillada DPL** **Garoowe**
**Ku:- Dhammaan Xubnaha Golaha Wakiillada DPL** **Garoowe**

Ujeeddo:- **Soo Jeedinta Guddiga Gaarka ee Falanqeynta Hindisaha Wax ka Beddelka Dastuurka ee ay soo Jeediyeen Golaha Xukuumaddu**

Guddiga Gaarka ee Golaha Wakiillada ee loo xilsaaray Falanqeynta Hindisaha Wax ka Beddelka Dastuurka ee ay soo Jeediyeen Golaha Xukuumaddu:

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 139-aad (2) ee Dastuurka DPL.

**MARKUU ARKAY:** Qoraalka Summadiisu tahay MW/DPS/139/2026, kuna taariikhaysan 21/06/2026, ujeeddadiisuna tahay Wax ka beddelka Dastuurka Dawladda Puntland.

**MARKUU ARKAY:** Qoraalka Summadiisu tahay XGGW/DPL/27/2026, kuna taariikhaysan 23/07/2026, ujeeddadiisuna tahay Magacaabid Guddi.

Wuxuu falanqeyn iyo daraasad ku sameeyey Hindisaha Wax ka beddelka Dastuurka Dawladda Puntland ee Xukuummaddu soo jeedisay, isagoo la akhriyey Dastuurka Dawladda Puntland, Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada, iyo Xeerarka kale ee dalka si waafaqsan qodobka 139-aad farqadiisa 2-aad ee Dastuurka Dawladda Puntland.

Haddaba, falanqeyn dheer ka dib, waxaa Guddigu Golaha u soo jeedinayaa arrimaha soo socda:

1. Waxaan Golaha Wakiillada u caddeynaynaa in Golaha Xukuumaddu soo jeedin karo hindisaha wax ka beddelka Dastuurka sida uu qabo qodobka 139-aad farqadiisa 1-aad xarafka (t) ee Dastuurka Dawladda Puntland.
2. Waxaan Golaha Wakiillada u soo jeedinaynaa in laga doodo wax ka beddelka Golaha Xukuummaddu soo jeedisay, lana mariyo habraaca ku cad qodobka 139-aad ee Dastuurka Dawladda Puntland.
3. Waxaan Golaha Wakiillada la socodsiinaynaa in wax ka beddelka Dastuurka ee ku saabsan qodobada 1-aad, 2-aad, 3-aad, 4-aad, 5-aad, 9-aad, iyo 13-aad ee madaxa 1-aad qeybtiisa 1-aad ee Dastuurka waxaa loo bandhigayaa afti dadweyne si waafaqsan qodobka 139-aad faqradiisa 5-aad.

Guddigu wuxuu sidoo kale caddeynayaa in qodobada hadda la soo jeediyey aysan ka mid ahayn qodobadaas u baahan aftida dadweynaha.

4. Haddii Goluhu ogolaado soo jeedinta waxay maraysa habraaca ku cad qodobka 139-aad ee Dastuurka Dawladda Puntland, iyadoo Golaha Wakiilladu sameynayo olole wargalin oo ku saabsan dib-u-habeynta, si loo xaqiijiyo in dadweynaha oo dhan ay xog-ogaal ugu noqdaan isbadalka lagu sameyanayo Dastuurka. Muddo aan bil ka yareyn kadib, Goluhu wuxuu u soo bandhigayaa soo jeedinta in lagu oggolaado ama lagu diido tiro dhan saddex meelood labo (2/3).
5. Wax ka beddelidda Dastuurka waxaa lagu baahinayaa Faafinta Rasmiga ah loomana cuskan karo diidmada qayaxan ee Madaxweynaha.
6. Warbxintan waxaa ku lifaaqan qodobada Wax ka beddelka Dastuurka ee Xukuummaddu soo jeedisay.

Ugu dambeyn, waxaan Golaha Wakiillada u soo jeedinaynaa in la meelmariyo Hindisaha Wax ka beddelka Dastuurka ee Golaha Xukuummaddu soo jeediyey.

**Mahadsanidiin**

**Guddiga Gaarka ah**

| Lr. | Magaca | Xilka | Saxiixa |
|---|---|---|---|
| 1. | Xil. Maxamuud Dhakuul Xirsi | Guddoomiye | |
| 2. | Xil. Maxamuud Shire Cismaan | Xubin | |
| 3. | Xil. Cabdikaafi Cabdi Abshir | Xubin | |
| 4. | Xil. Maxamed Salaad Cabdi | Xubin | |
| 5. | Xil. Mukhtaar Cabdiraxmaan Axmed | Xubin | |
| 6. | Xil. Axmed Jaamac Maxamed Idiris | Xubin | |
| 7. | Xil. Maxamuud Cabdiraxmaan Maxamuud | Xubin | |
| 8. | Xil. Maxamed Cawil Cali Dalaf | Xubin | |
| 9. | Xil. Faysal Maxamed Dalmar | Xubin | |